**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

# Xeer-nidaamiyaha 10aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# Indho-furka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**Tusmo**

***1. Hordhac*** ........................................ ***1***
1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda ........................................ 1
1.2. Mabaa'diida Hagaya ........................................ 1
1.3. Waxa lagu maamulayo ........................................ 1
1.4. Erey-bixinta ........................................ 2
***2. Barnaamijka Indho-furka*** ........................................ ***3***
2.1. Hadafka laga leeyahay Barnaamijka Indho-furka ........................................ 3
2.2. Doorka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ........................................ 3
2.3. Mas'uuliyadda maareeyeyaasha ........................................ 5
2.4. Mas'uuliyadda Qofka Shaqaalaha ah ........................................ 5
***3. Cabashooyinka & Rafcaannada*** ........................................ ***6***
***4. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha*** ........................................ ***6***

# 1. Hordhac

1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31aad, Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 waxaana sida ay sheegayso faqradda 1.4.1(f) marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka.

1.1.3. Xeer-nidaamiyaha waxaa uu sameynayaa habraacyada ay tahay in ay raacaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Hay'adda Loo Shaqeeyo marka ay ka shaqeynayaan indho-furka shaqaalaha rayidka ah ee dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga, ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka.

1.2.2. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda saraakiisha la soo doortey, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee ay wada shaqeeyaan, iyo dadweynaha.

1.2.3. Saraakiisha la soo doorto waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

1.3. Waxa lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo waxa xagga hoose lagu cayimey, xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa indho-furka dhammaan shaqaalaha maamulka iyo maareynta ee Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan.

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixinayaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidanka booliska, ciidamada amniga, iyo ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la soo doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha golayaasha ama

Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha

e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi

f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. <u>Erey-bixinta</u>

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyadan waxaa ay yeelanayaan macnaha soo socda;

a) ***"Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

b) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

c) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

d) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***<u>Qof</u> Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo..

i) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

j) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

k) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

l) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

m) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

# 2. Barnaamijka Indho-furka

2.1. Hadafka laga leeyahay Barnaamijka Indho-furka

2.1.1. Dhammaan shaqaalaha cusub oo loo qaato in ay ka mid noqdaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay Barnaamijka Indho-furka Shaqaalaha ay qaataan bisha ugu horreysa marka shaqada loo qaato.

2.1.2. Indho-furku waxaa uu muhiim u yahay hubinta in dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda si faahfaahsan loogu sharxo arrimaha la xiriira Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si awood loogu siiyo in ay shaqadooda ugu gutaan si gaarsiisan heerka looga baahan yahay. Barnaamijka indho-furka waa in uu shaqaalaha rayidka ee dowladda sharaxaad guud ka siiyaa shaqaalaha rayidka ee dowladda, Wasaaradda Kale ee ay ka shaqeynayaan iyo in uu hubiyo in ay ka warqabaan xeer-nidaamiyeyaasha, siyaasadaha iyo habraacyada ku habboon oo ay ka mid yihiin xeer-dhaqan-anshaxeedyada iyo macluumaadka kale ee ay ugu baahan yahay qabashada hawshooda.

2.2. Doorka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

2.2.1. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu mas'uul ka yahay isuduwidda in shaqaalaha cusub ay qaataan barnaamijka indho-furka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, bisha ugu horreysa marka ay shaqada bilaabaan gudaheeda. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in shaqaalaha cusub uu bisha ugu horreysa shaqada gudaheeda uu u diraa waraaq uu kaga codsanayo in ay ka soo qaybgalaan barnaamijka indho-furka (eeg **Foomka 10.1**, ee la socda Tilmaanta I ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

2.2.2. Halkii ay suuragal tahay barnaamijka indho-furka waa in loo sameeyo qaab hubinaya in kooxaha kala duwan ee shaqaalaha cusub ah ay iskumar wada qaataan barnaamijka indho-furka si loo hubiyo in si hufan loo qabto.

2.2.3. Barnaamijka indho-furka ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa ka mid ahaanaya:

a) Hanuuninta/towjiihinta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda:

i. Nidaamka Dowladeed ee Soomaaliya
ii. Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda iyo Hay'adaha Dowladda
iii. Doorka iyo Qaab-dhismeedka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
iv. Doorka iyo Qaab-dhismeedka Hay'adeed ee Wasaaradaha
v. Shuruucda iyo Xeer-nidaamiyeyaasha Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
vi. Xeer-dhaqan-anshaxeedka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
vii. Shaqada iyo Faa'iidooyinka (Mushaaraadka & Gunnooyinka) Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda
viii. Anshaxa

b) Ku hannuuninta/towjiihinta Wasaaradda

i. Hadafka iyo Qorshaha Guud ee Wasaaradda
ii. Qaab-dhismeedka iyo Hawlaha Wasaaradda
iii. Xiriirrada Dibadeed
iv. Siyaasadaha iyo Habraacyada

c) Ku-hannuuninta/Towjiihinta Shaqada

i. Mas'uuliyadaha Shaqada
ii. Shuduuraha Shaqaaleynta
iii. Xeer-dhaqan-anshaxeedka
iv. Fursadaha Horumarka Xirfadeed
v. U-adeegga Macaamiisha
vi. Maareynta Macluumaadka
vii. U-samafalka iyo Taageerada Shaqaalaha
viii. La-dhaqanka dadka kale.

2.2.4. Hannuuninta/towjiihinta hore ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa sameynaya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda halka Ku-hannuuninta/towjiihinta Wasaaradda iyo shaqada ay mas'uuliyadda sameynteeda ay leeyihiin Wasaaradda iyo maareeyeyaasha u habboon. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu mas'uul ka yahay hubinta in barnaamijka indho-furka loo cusbooneysiiyo hadba sida ay lagamamaarmaanka u noqoto si loo hubiyo in uu u habboon yahay baahida shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

2.2.5. Marka la qaato shaqaalaha waa in liisto-hubineedda indho-furka (eeg **Foomka 10.2**, ee la socda Tilmaanta I ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), uu Agaasimaha Shaqaalaha ee Wasaaradda Kale uu ka buuxiyaa mid kasta oo ka mid ah shaqaalaha uuna u gudbiyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu u ansaxiyo.

2.2.6. Nuqul ka mid ah liisto-hubineedda waa in la geliyaa galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

2.2.7. Qof kasta oo shaqaale ah oo dhammeysta barnaamijka indho-furka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa la siinayaa waraaq rasmi ah iyada oo la adeegsanayo **Foomka 10.3**, ee la socda Tilmaanta I ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, taas oo sheegeysa in uu si buuxda uu u dhammeystey barnaamijka indho-furka shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

2.3. <u>Mas'uuliyadda maareeyeyaasha</u>

2.3.1. Waa mas'uuliyad ay leeyihiin maareeyeyaasha in ay hubiyaan in shaqaalaha cusub la siyo macluumaadka lagamamaarmaanka ah iyo hagidda ay ugu baahan yihiin in ay si taabogal ah u qabsadaan shaqooyinkooda kala duwan. Dhammaadka geeddi-socodka barnaamijka indho-furka, shaqaalaha cusub waa in ay:

a. faham wanaagsan ka haystaan doorka ay ku dhex leeyihiin shaqaalaha rayidka ah ee dowladda iyo Wasaaradda ay ka shaqeeyaan iyo in ay fahamsan yihiin waxyaabaha loogaga baahan yahay jagadooda;

b. faham cad ka haystaan shuruudaha shaqaaleyntooda,

c. fahamsan yihiin siyaasadaha iyo habraacyada lagu maamulo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

2.3.2. Maareeyeyaasha waa in ay ka warqabaan shaqaalaha cusub ka dib barnaamijka indho-furka iyo guud ahaan inta lagu jiro muddada tijaabinta ah si ay u hubiyaan in shaqaalaha ay shaqadooda cusub si wanaagsan u gudanayaan.

2.3.3. Maareeyeyaasha waxaa sidoo kale looga baahan yahay in ay diyaariyaan warbixinnada hawlqabadka shaqaalaha cusub inta lagu jiro muddada tijaabinta ah sida uu tilmaamayo Xeer-nidaamiyaha 1aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Shaqo-qorista, dalacsiinta iyo beddelaadda shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

2.4. <u>Mas'uuliyadda Qofka Shaqaalaha ah</u>

2.4.1. Shaqaalaha cusub waxaa saaran mas'uuliyad ah in ay hubiyaan in ay:

a. akhriyaan dhammaan dokumentiyada la siiyo inta uu socda barnaamijka indho-furka;

b. saxiixaan dhammaan dokumentiyada u habboon; iyo

c. joogteeyaan heerarka hawl-qabadka loogaga baahan yahay jagada.

## 3. Cabashooyinka &Rafcaannada

3.1. Haddii qof shaqaale ah uu u arko in si aan caddaalad ku dhisneyn loola dhaqmey inta ay socoto arrin kasta oo la xiriirta Xeer-nidaamiyahan, markaa waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Guddiga si uu arrinta ugu baaro si waafaqsan Habraacyada Rafcaannada ee lagu cayimey Qodobka 30aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017

## 4. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha

4.1. Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la igu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.



Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya